

Mawlid al-Nabi: Bayaanka Wasiir Yaseen

Sibtambar 28, 2023

Wasiirka Socdaalka iyo Dhaqamada Kala Duwan Muhammad Yaseen wuxuu soo saaray bayaanka soo socda oo ku saabsan Udabbaal Dagga Dhalashada Nabiga:

“Maanta, Muslimka dunida ku nooli waxay u dabbaal dagayaan dhalashada Nabi Muhammad, nabad iyo naxariisi korkiisa ha haatee, bishan saddexaad ee taariikhda Hijriga. In badan oo ka mid ah 200,000 ee Muslim ee ku sugan Alberta ayaa fasaxan muhiimka ah dabbaaldagaya iyagoo u dabbaaldagaya qaabab kala duwan.

“Muslim kasta oo maalintan udabbaal dagaya, waxa aan ku kalsoonahay in Mawlid al-Nabi, oo sidoo kale loo yaqaan Ciidda Dhalashada Nabiga, ay tahay wakhti mihiim ah oo lagu sharfayo shakhsii aasaas u ah diinta Islaamka iyadoo tan ay la wadaagayaan dhammaan dadka muslimiinta ah ee dunida ku nool. Marka aad isu timaadaan si aad u tukataan, u dhagaysataan wacdiyo ku saabsan nolosha Nabi Muhammad, (Nabad iyo Naxariis korkiisa ha Ahaatee), iyo Qur'aan akhris, waxa aan rajaynayaa inaad noqtaan kuwa iimaankoodu sii xoogaysto.

“Waxa aan u rajaynayaa qof kasta Mawlid al-Nabi barakaysan oo farxad leh!”

Su'aalaha warbaahinta

Michael Kwas

Xoghayaha Saxaafada, Socdaalka iyo Dhaqamada Kala Duwan

michael.kwas@gov.ab.ca

780-264-5368